

## **HEERKA QIDMAATHA ISKOOKA DEGMADA AASIMADA SALT LAKE ii DULMARKA KA REEBOWKA QIDMAATHA**

HATTII KAALMA AN BAAHANTA OO LAKA FAHAMAW OGEYSIINTUN, WALAALOW LA HIRIIR BOB  
MUENCH ee (801) 578-8378.

Hagaagun may an qoranyaa inii kii kaalmeeya weydiyowka heerarka ii Iskoolka Degmatha Aasimada Salt Lake ii nidaamyatha ku reebowka qidmatha iskoolka la hiriira ii an qalamowka ku reebowka.

### **Hakoobowka**

1. Shariga Utah may an ogolaathey ka dala'awka qidmooyinka fasaloo todoba illaa tuma ii lama. Tan may luku wathey inii kutaabkaa luku fathaw qidmooyinka qoraalatha iskoolka, saadadka, hooloo, ii barnaamijyatha.
2. Qidmooyinka kulushoo may quseeyaana ku reebowka.
3. Kutaabta oo dhan oo lan diithi odsyaalka ku reebowka qidmatha may leeyiina haquuqta ra'faanka.

### **Heerka Ku reebowka Qidmatha Degmaatha**

Guddiga Wal barashatha Dugsiga Degmatha Aasimada Salt Lake may ha saarey oo ansihiyey heerka ku reebowka qidmaatha ii jadwalka qidmaatha sitha quseyta shariga gobolka. Heerka, nidaamyatha, ii jadwalka qidmaatha may laku hela koree bogga websaydka degmatha: [slcschools.org/board-of-education/policies/](http://slcschools.org/board-of-education/policies/) - hoos an jiid baalka oo weydi S-10: Qidmooyinka Kutaabka ii Ku reebowka Qidmatha.

### **Nidaamka Ku reebowka Qidmatha**

Maamulaaga iskool kasta may lan hil saarey sithii qof fiiriyaw oo go'aan ka deeraw odsiyatha ku reebowka qidmatha. Degmatha may ku gohona inii hubiitha in nithaamka laka helaw ku reebowka qidmaatha lan maamula si adaalad eh, sitha ujeedka eh, iyee oo an jarna daahaw. Sithoo kala, degmatha may suubiyaasee hubaalka inii nithaamka ku fogaathaw dhalee'atha, eebta, feejignaanta aathiga aan hayna, ii uleys ma'quul aan hayna oo kutaabta ii waalidka. Nithaamka ma weel dhathaw tilmaamayaal lan aragaana oo an hogaamiyaw qof kasta si an aqoonsatha odsathayaalka ku reebowka qidmatha, oo an jarna kutaabta degmatha (anku hayna kutaabta reeroshoo/waalidka odsathooyo) may lan ogolyaa inii ka kaalmoyto nithaamka odsathaga. Aqbaarta ku kooyaasa reeroo/waalidka may laka haayee qarsoodiga anka toosan intii laka jara nithaamka oo dhan.

Sithoo kala, walaalow ogaw inii kutaabka helooya ku reebowka qidmaatha mal anla dhaqamaw si ka duwan kutaabta kala, ii may lan aqoonsathey sithii kutaabka ka jara ku reebowka qidmaatha oo kutaabta kala, hubnaha shaqaalaga, ama dadka kala anKa baahanayna ogaanshaga inii aqbaarta.

### **An qalamowka Ku reebowka Qidmatha**

Kutaabka may an qalamey ku reebowka qidmatha hattii:

1. kutaabka an qalama qatha bilaash eh sitha waafaqsan heerarka USDA
2. kutaabta may heley SSI
3. reerka kutaabka may heley TANF
4. kutbaata may ka jaraana daryeelka koriska, ama

## 5. kutaabta may ka jaraana haayowka degmatha

Intas may dheera, hattii atha qobto gurmadka dhaqaalaga oo sababeen qasaaraga shaqada, jirooyinka wiin, ama qasaaraga kala ee wal ku oolka daqliga dhaafsan hakameeyowka, onogaa may anqalama koree ku reebowka qidmatha hittaa sharuuda an qalamowka kala lan buyna. Hittaa hattii kutaab anka qalana heerarkun, iskoolka waa inii wili biyaa ku reebowka qidmaatha hattii ku dala'awka qidmaatha diithaw kutaabka fursata si buyta lan ku qiibgalaw ama lan dhammaasiraw sharuuda sababtoo eh awoodla'aanta laka biyaw qidmaatha.

Si kastaba, si markas lanka qalama ku reebowka qidmatha, iskoolka waa inii helaa WARAAQAGA laga adeeyaw an qalamowka kutaabta. Waa inii dhammaasirtaa Odsaga Ku reebowka Qidmatha ka haboon oo an gudbi maamulaaga iskoolka oo fiiriowshoo ii ansihintaa. Odsadayaalka may lan heley hafiiska guud ee iskool kasta ii qidmooyinka iskoOLka Guddiga Wal barashaatha Gobolka Utah bogga webka: <https://www.schools.utah.gov/schoolfees?mid=4340&tid=3>. Sitha an ka dhaqsi bathan oo ha dirta foomamka dhammaasiran, sharuudoo qidmaatha may quseeyaayaana illaa go'aanka anka dambeeya la suubiya oo ka saabsan an Qalamowka kutaabka oo ku dhaafowka qidmaatha. Hattii odsaga la diitha, iskoolka may hakin direy Foomka Go'aanka ii Ra'faanka. Foomka may kiin sheegey sababta odsaga lan diithi oo fafaahi sithii lan ku ra'faan qaathathaw go'aanka. Hattii atha ku ra'faan qaathata diidmatha ku reebowka qidmaatha, man baahaniithi inii isku biitha qidmaatha illaa ra'faanka la go'aansatha.

Hattii kutaabtaa an qalamaan ku reebowka qidmaatha, qidmooyinka kulushoo may buwaa inii luku reeba, oo ka jaraan – laakin maku hadithan – haan higaan:

Qidmooyinka diiwaangeliyowka, qoraalatha buugta, buug-qoraalka ii qalabka dabaajiyatha, saadadka iskoolka, kaararka hoola, hooloo ta'liinta dhaafsan, ii qufalatha iskoolka; qidmooyinka sheybarka ii dukaamatha; qidmooyinka jiimka ii shukumaanka; qarashaadka oo labiska iyo isbeeratha; safaroo dalhiiska ii qidmooyinka usu kooyowka; qarashaadka safaroo fasalka ii koohta; ii qarashaadka qalabyatha muusikatha oo laka isti'maalaw fasaloo iskoolka ama hooloo.

Ma jaraan walyaala saas amal eh sithii qima "lanku reeba korno" ama "iqtiyaar eh", laakin badelatha ku reebowka qidmaatha may laka diyaariyi koree haalathoo qaarshoo, laakin ma eh qidmooyinka buugga qoraalka. Iskoolka maka warsatha koro inii suubithi beesa biyow kiskistoo eh, IOUs, ama qorshooyinka beesa biyowka daayi.

Qarashaadka faraantiyada fasaloo, kutaabta sannadka, sawiryalka iskoolka, jaakathoo warqada, ii sheeyoo la midka eh ma eh qidmooyinka oo may an baahanyiin inii lanku reebna. Saas oo kala, hattii kutaabkaa lumiyi ama an wal yeela dhismooyinka iskoolka si ka haboon, qarashooyinka badelka ama suubiyowka ma eh qidmooyinka oo may an baahantaa inii luku reeba. Kutaabta ay an baahatha kortee inii biitha qidmooyinka oo diiwaangeliyowka isku midka eh ama koorsooyinka meeleynta hormarsan. Qiibta qidmooyinka la hiriirta gaar haan kuleejka ama buundooyinka iskoolka sara dhaafsan ama buundatha ma quseyta ku reebowka qidmaatha. Intas may dheera, bas eh kutaabtaas oo biyeen buugga qoraalka aMA dabaajiga qalabka an qalamaan inii helaan beesa nagowka dabaajiag oo dhammaadka sannadka.

Iskoolka ii shaqaalaga iskoolka ma reeba koraan, yareeya koraan, ama ma hoojiya koraan fasaloo ama buundooyinka, ama ma la hera koraan fasaloo, buundada, kaararka wargeliyowka, qoraalka, ama dibloomooyinka si lan hoojiya beesa biyowka qidmooyinka. Iskoolka may reebada koree diiwaanada

kutaabka rasmiga eh oo masuuliyada kutaabka oo hantitha lunti ama wal yeelanti oo iskoolka isku leh; si kastaba, ma reebatha koro diiwaanka kutaabta oo ku roojiyaasa kutaabka ku qiibgalowka iskoolka amA si ka haboon lan ka meeleyl iskoolka.

Warqada an qalamowka ku reebowka qidmatha MAL an baahan sannad kasta laakin mal anku baahathey waqta kasta iskoolka ama waalidka may warsatha koree reed an fiiriyow oo sabab fayla. Saas oo kala, waraaqaga WAA INII an joogteyna sababoo qarsoothiga. Iskooloo may wareejiya koree aqbaarta an qalamowka ku reebowka iskoolatha kala oo kutaabta horamrtta ama wareejiska.

Hatii atha su'aala qobto, marka koowaad la hathal maamulaaga iskoolka ama wakiilka degmatha iskoolka oo hoos laka qori:

Hogaanka Iskoolka ii Laanta Wal qabathowka (801) 578-8350

Hattii atha jeelaatha fadi koobiga nithaamyada degmatha dhammaasiran oo la hiriirta qidmooyinka ii ku reebowka qidmatha, tafathal kula hiriir Bob Muench (801) 578-8378.